



Wararka Cusub ee ugu Dambeeyey Arbacada: Waa Sii Soconeysaa Waxbarashadii Guryaha Lagu Qaadanayey; Dhismayaashu Iskuuladu Waa Xiran Yihiin; Macluumaadka Muhiimka ee Cuntada

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Iyada oo taya'ada hawada magalaadeenu ay wali tahay mid waxyeelo ku ah caafimaadka dadweynaha, dhammaan goobihii iskuuladu berito oo Arbaca, bisha Sebtember tahay 16 waa sii xirnaan doonaan.

- Waxbarashadii guryuhu lagu qaadanayo waa ay sii socon doontaa sidii loogu talagalay ee jadwalku ahaa.
- Dhammaan hawlihii ku salaysnaa iskuulada waa la baajiyey, marka laga reebo cuntada oo sidii hore loo qeybinayo.
- **Cuntada waxaa laga qeybin doonaa dhammaan [goobaha cuntada PPS](#)** (marka laga reebo Dugsiga Hoose ee Woodlawn) maalinta Arbacada ah, iyada oo la soo koobay saacadihii laga bilaabo 3:00-4:00 p.m. Fadlan waxaad ogaataan in marka cuntada la qeybinayo ay ka gedisnaanto sidii markii hore loo qeybin jiray, maadaama ay shaqaalaha cuntada qeybinayaa hadda ay ku sugan yihiin gudaha iskuulada ilaa ardayda iyo qoysasku ka imanayaan.
- Fadlan waxaad sidoo kale ogaataan **in la baahiyey cuntadii guryaha la geynayey sidii jadwalku ahaa maalinta Arbacada ah** sababtoo ah walaaca aan ka qabno hawada xumaatay awgeed, iyada oo aan guryaha la gaarsiin doon maalinta Khamiista ah.

Waxaan idiin rajeyneynaa dhammaantiin caafimaad iyo nabadgelyo.